



**Jamhuuriyada Somaliland.**

**Golaha Wakiilada JSL.**



## **Warbixinta**

**Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 15<sup>aad</sup> ee  
Golaha Wakiilada JSL.**

**13/06/2011-30/07/2011**

**Ku: - Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.**

**Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 15aad**

*Mudanayaal*

Si aad hawlaha qorshaynta kal-fadhiga 16aad ee golaha wakiilada u dardar galisaan una gudataan xilka la idiin soo igmaday, waxaan halka idiinku soo gudbinayaa waxqabadkii golaha wakiilada ee kal-fadhigii 14aad oo dhamaystiran si aad u xasuusataan..

Kal-fadhigan oo ahaa kal-fadhi mudadiisu dheerayd wax qabadka goluhuna aad u badnaa.

### **Kal-fadhigii 15aad**

| No | Kal-fadhiga | Taariikhda uu furmay | Taariikhda uu xidhmay |
|----|-------------|----------------------|-----------------------|
| 1. | 15aad       | 13/07/2011           | 30/07/2011            |

Kal-fadhigan oo Mudanyaashu ka doodeen ajendaha kal-fadhigan doodan oo socotay 2 maalmood ayna ka qayb qaateen 11 mudane ayuu ka soo baxay Ajendihii kal-fadhigii 15aad oo la ansixiyay.

### **Ajendaha Kal-fadhiga 15aad**

1. Warbixinta Shirgudoonka, Gudidda Joogtada iyo Gudiyada Kale ee Golaha
2. Qiimaynta Xaalada Abaaraha Dalka ka taagan.
3. Mashaariicda sharci ee Golaha horyaal
4. Ansixinta Masuuliyiinta Qaran
5. U yeedhista Masuuliyiinta Qaran
6. Iyo Wixii kale ee soo kordha

Warbixinta Shirgudoonka iyo Gudiyada kale ee Golaha

Warbixintii shirgudoonka ee kal-fadhigii 14aad ayaa ugu horaysay warbixinadii kal-fadhigaa laga akhriyay golaha intaa ka dibna waxaa warbixinadii gudiyadu ahayd sidan hoose:-

| No | Gudidda   | Cida soo jeedisay   |
|----|---|---|
| 1. | Warbixinta Gudidda Joogtada   | Gudoomiyaha G. Md. Maxamed Barkhad miigane  |
| 2. | Warbixinta Gudida Arrimaha Dibada, iskaashiga caalamiga ah iyo Qorshaynta Qaranka | Md. Xusen Maxmaed Cige. Oo ka warbixiyay waftigii uu ka midka ahaa ee uu Madaxweynuhu Hogaaminayay ee ka qaybgalay Xafladii Koonfurta Suudaan |
| 3. | Warbixinta Gudidda Arrimaha Bulshada  | Md. Axmed Maxamed Kijandhe  |

## 1. Xeerarka Goluhu ka dooday iyo kuwii la Ansixiyay.

| Taariikhda    | Xeerka laga dooday/ansixiyay   | Halka uu maray | Halka loo gudbiyay |
|---------------|--|----------------|--------------------|
| 05/02/2011    | Waxa ka badalka Xeerka Kala Xadaynta mushaharooyinka Q/kiisa 10 <sup>aad</sup> | Ansixin        | Madaxweynaha       |
| 20/02/2011    | Xeerka Biyaha Qaranka  | Ansixin        | Madaxweynaha       |
| 08/02/2011    | Xeerka Sharciyada NDRC   | Ansixin        | Madaxweynaha       |
| 20/03/2011    | Tacriifada Adeega Madaarada  | Ansixin        | Madaxweynaha       |
| 27-28/03/2011 | Wax ka-badalka iyo kaabista Xeerka G iyo degmooyinka                           | Celin          | Madaxweynaha       |
| 04-10/04/2011 | Xeerka Isgaadhsiinta   | Ansixin        | Guurtida           |

## 2. Masuuliyiinta Goluhu Ansixiyay Kal-fadhiga 14aad

| No | Magaca Masuulka       | Xilka uu hayo         | Taariikhda la Ansixiyay |
|----|-----------------------|-----------------------|-------------------------|
| 1. | Axmed Cabdi Xaabasade | W/W/Warfaafinta       | 19/02/2011              |
| 2. | Cabdi Aw Daahir       | W/W/Xanaanada Xoolaha | 19/02/2011              |

*Warbixinta Kal-fadhigii 14aad ee Golaha Wakiilada*

### 3. Masuuliyiinta Qaran ee Goluhu Ansixiyay

| No. | Masuulka                   | Xilka Masuulka                               |
|-----|----------------------------|--|
| 1.  | Md. Maxamed Siciid Gacamay | Wasiirka Wasaarada Deegaanka iyo Reer miyiga |
| 2.  | Md. Xirsi Cali X.Xasan     | Wasiirka Wasaarada Madaxtooyada              |
| 3.  | Md. Cabdi siciid Faahiye   | Wasiirka Wasaarada Ciyaaraha Iyo Dhaqanka    |
| 4.  | Md. C/risaaq Cali Cismaan  | Wasiirka wasaarada Dib-udejinita             |
| 5.  | Md. Cabdi Faarax Geedi     | Xubin Gudidda Cadaalada                      |
| 6.  | Md. Aadan Jaamac Maxa'ed   | Xubin Gudidda Cadaalada                      |

### 4. Fadhiyada Wada jirka ah ee Laba Gole.

Labada Gole intii lagu jiray kal-fadhigan waxay fadhi wada jir ah yeesheen saddex fadhi, fadhigii ugu horeeyay oo waxay mudanyaasha Labada Gole fadhi wada jir ah ku ogolaadeen xilka qaadistii Gudoomiyahii Maxkamada Sare oo Madaxweynuhu u soo gudbiyay cod gacan taaga ahna ay Gudoomihii maxkamada Sare xilka qaadistiisa ay ku ogolaadeen, sidoo kale waxay fadhi wada jir ah yeesheen fadhigii ay ku ansixinay Gudoomiyaha Cusub ee Maxkamada Sare.

Mudanyaasha Goluhu waxay sidoo kale fadhi wada jir ah yeesheen kulan uu booqasho safar dalka ku yimi wafti ka socda midowga yurub iyo wadama deeq bixiyayaasha

## 6. Xeerarka Guddiyadu hayaan

| No        | Magaca Guddiga iyo Xeerarka ay kala hayaan  |
|-----------|---|
| <b>1.</b> | <b>Guddiga Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada</b>  |
|           | 1) Xeerka Midaynta Cashuuraha<br>2) Xeerka Caymiska Qaranka<br>3) Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency<br>4) Xeerka Baanka Dhexe<br>5) Xeerka Baananka Islaamiga ah |
| <b>2.</b> | <b>Guddiga Garsoorka, xuquuqal insaanka iyo Dastuurka</b>   |
|           | 1) Wax-ka bedelka iyo Kaabista Xeerka Ciqaabta guud<br>2) Xubnaha Komishanka Xuquuqda Aadamaha<br>3) Xubnihii Guddiga Caddaalada  |
| <b>3.</b> | <b>Guddiga Joogtada iyo Anshaxa</b>   |
|           | 1) Xeerka Anshaxa Guud Xeerka<br>2) Xeerka Habka Maamuuska Mudanayaasha   |
| <b>4.</b> | <b>Guddiga Arimaha Bulshada iyo Diinta</b>  |
|           | 1) Xeerka Shaqaalaha Dawladaha Hoose<br>2) Xeerka Saxaafada<br>3) Xeerka Ciyaaraha  |
| <b>5.</b> | <b>Guddiga Arimaha Gudaha, difaaca Iyo nabadgalyada Guud</b>  |
|           | 1) Xeerka Nabadgalyada Guud<br>2) Xeerka Caasimada  |
| <b>6.</b> | <b>Guddiga Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah</b>  |
|           | 1) Xeerka Wadamarista Gaadiidka   |

## 7. Aqoon-korodhsiyada Guddiyada Golaha

### 1. Guddiga Joogtada

Waxa Guddigan loo qabtay aqoon korodhsi ku saabsan sida ay u shaqeeyaan Baarlamaanada Dhigeena ah kaas oo ay wax badan ka korodhsadeen

mudanayaashu, aqoon iswaydaarsiga oo laba jeer oo kala duwan la qabtay wuxuu ka kala dhacay Hotel emperial iyo Maansoor hotel, iyadoo uu bixinayay Mudane ka tirsan Barlamaanka dalka Kenya oo la yidhaahdo **peter oloo oringo** oo Mudo ka tirsanaa baarlamaanka, iminkana ah Gudoomiyaha Gudidda Adeegyada Barlamaanka Kenya.

## **8. Waxqabadka Guddiyada**

### **8.1. Gudidda Garsoorka Shuruucda iyo Xuquuqal insaanka,**

1. Guddidu waxay talo bixin ka soo sameeyeen Xubnihii komishanka Xuquuqal insaanka kuwaas oo ku soo talo-bixiyeen in la ansixiyo,
2. Waxaa kaloo Guddidu ay ka soo talo-bixisay xubnihii gudidda cadaalada oo laga rabay inay ka soo xushaan laba xubnood.

### **8.2. Gudidda Joogtada iyo anshaxa.**

Gudidda Joogtada iyo anshaxa oo Golaha ka wakiil ah intuu xidhan yahay, waxay iyadoo gudanaysa waajibaadkeeda ay kulamo Xogwaraysi ay la yeelatay:-

1. Hanti dhawraha Qaranka
2. Wasiirka Arrimaha Dibadda
3. Wasiirka Arrimaha Guddaha
4. Wasiirka Waxbarashada iyo Tacliinta sare
5. Xisaabiyaha Guud ee Qaranka.

### **8.3. Gudidda Dhaqaalaha.**

Gudidda dhaqaaluhu waxay Xeerka Baanka Dhexe u qabatay workshop ay ugu talo gashay in xeerka lagu lafa guro oo cidaha uu khuseeyaa uga talo-bixin lahaayeen, workshopkan oo ka dhacay Maanson Hotel waxaa lagu casuumay dhamaan hay'adaha kala duwan ee xeerku khuseeyo iyo shakhsiyaad Aqoon iyo khibrad u leh arrimaha Baananka.

## **9. Weftiyada Golaha ka baxay.**

Wafti ka kooban labada Gole ayaa dabayaaqadii bishii saddexaad booqday wadanka Botswana, gaar ahaan barlamaanka dalkaasi, wafitigan oo ka koobnaa shan mudane iyo Xoghayaha Golaha Guurtida oo dhinaca iyo Gudoomiye ku-xigeenka 2aad iyo Xoghaya Guud ee Golaha Wakiilada JSL oo

marka la isug geeyo ka koobnaa 8 xubnood, waftigan oo dhaqaalaha ay ku baxeen ay ka caawisay Hay'ada AWEPA oo Goloyaasha Baarlamaanka la shaqaysa.

Baarlamaanka dalkaasi botuswana ayaa si fiican u soo dhoweeyay waxayna la kulmeen madaxda labada Gole ee dhigooda ah, iyagoo soo indha indheeyay siday u shaqeeyaan labadooda Gole iyo waxyaabaha iskaga mid yihiin ama kula duwan yihiin isla markaana ka soo helay aqoon iyo waaya'aragnimo dheeraad ah.

Waxaa kaloo wafti hawleed Golaha Dibada uga baxay Gudoomiyaha Guddida Arrimaha Dibada oo wahelinayay waftigii balaadhnaa oo magaalada Nairobi kula kulmay Jamciyada Quruumaha ka dhaxaysa, waa markii ugu horaysay oo wafti xukuumada ah xunbo Golaha ka mid ahi ku weheliyaan.

## **C/risaaq Siciid Ayaanle** **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.**